
Bilde: Mostphotos

# Ma rabtaa inaad ka qaybgashid tilmaansiinta waalidiinta?

**Qof kasta waxa uu rabaa inuu waalid wacan u noqdo ilmihiisa. In waalid lagu ahaado waddan aan ahayn kii aad ku soo kortay waxa uu keeni karaa dhibaatooyin cusub. Waxannu rabnaa in aannu adiga iyo qoyskaaga ku soo dhawayno daraasad-cilmiyeed ku saabsan tilmaansiinta waalidiinta. Waxannu raadinaynaa qoysas qaxooti ah oo haysta carruur jirta da' u dhaxayaa 6 iyo 12 sanno jir oo jooga Noorway.**

PIRM

MAXAY DARAASADU KU SAABSANTAHAY?
In waalidka laga xoojiyo dhinaca doorka waalidnimo iyo wadadhaqanka u dhexeeya iyaga iyo carruurtooda. ; In wax laga ogaado in tilmaansiinta waalidiintu ay caawinayso qoysaska qaxootiga ah.

WAA MAXAY MACNAHA KA QAYBGALKU KUU LEEYAHAY?
Waxaad ka qaybgeli doontaan mid ka mid ah barmaamijyadan tilmaansiinta waalidiinta ah (si nasiib ah ayaa loo qaybinayaa):; International Child Development Programme (ICDP) oo ah kooras tilmaansiin waalid oo soconaya 12 toddobaad ; Sannadaha Cajiibka Ah (DUÅ) oo ah kooras tilmaansiin waalid oo soconaya 15 toddobaad ; Qof kasta oo ka qaybgala waxa la weydiin doonaa inuu buuxiyo foom su'aalo ah. Qaar ka mid ah qoysaska ayaa laga qaadi doonaa waraysi. Isla markaana qoysaska kala badhkood ayaa laga codsan doonaa inay soo gudbiyaan warcelin iyagoo isticmaalaya barmaamij app ah.; Dhammaan macluumaadkiina waxa loo maarayn doonaa si sugan oo ammaan ah.

FAA'IDOONYINKA KU JIRA KA QAYBGALKA
Waxaad ka qaybgeli doontaan barmaamij tilmaansiin waalidiin (DUÅ/ICDP) oo ku salaysan koox-koox. Kooxaha waxaad kula kulmi doontaan waalidiin kale oo aad la wadaagi kartaan waayo-aragnimadiina. Ujeedadu waxa weeye in hooyada ama aabuhu noqdaan waalid sugan marka ay fahmaan waxyaalaha ay sameeyaan ee u wacan ilmahooda. Hadyad ayaa heli doontaan marka aad ka jawaabtaan foomamka su'aalaha ee saddexaad iyo marka aad ka jawaabtaan ka afaraad.

YAA KA QAYBGELI KARA?
Qoysaska haysta carruurta da'doodu tahay 6 ilaa 12 sanno oo Noorway soo degay xilli ka mid ah sagaalkii sanno ee u dambeeyey.

SIDEE UGA QAYBGALAYSAAN?
Eeg tilmaamaha ku qoran bogga dambe ee buug-yarahan.

# QAABKAN AYAAD KU OGOLAANAYSAA KA QAYBGALKA DARAASADDA

## Waxaad ku ogolaan kartaa qaab warqad ama elektoroonig ah

**Qaabkan ayaad ku bixin kartaa ogolaansho elektoroonig ah:**

- Gal bogga internetka ee daraasadda PIRM: https://uit.no/forskning/pirm
- Taabo “Ogolaansho” adiga oo dooranaya luuqadda aad rabtid.; Waxaad kala dooran kartaa noorweyji, ingiriisi, soomaali, carabi, faransiis, sawaaxili, turki iyo tigirinya
- Ku gal MinID
- Akhriso qoraalka macluumaadka ah ka hor intaanad ogolaan ka qaybgalka daraasadda; Ku buuxi macluumaadka xidhiidhka oo dir

**Haddii aad rabto inaad warqad ahaan ku bixiso ogolaanshaha, la xidhiidh barta adeega ee kuu dhow si ay kaaga caawiyaan ka qaybgalka.**
**Qofka lala xidhiidhayo:**

_ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _

_ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _

Masuuliyiinta daraasadda ayaa kula soo xidhiidhi doona. Dhammaan macluumaadka la soo helo waxa loo kaydinayaa qaab sir ah. Qasab maaha ka qaybgalka daraasaddu isla markaana waxaad ka bixi kartaan xilli kasta. Ka qaybgalka darasaadu wax saamayn ah ma ku yeelan doono adeegyada aad ka heshaan hay’adaha adeegyada caafimaadka.

Haddii aad qabtid su’aalo ama wax kale oo ku saabsan daraasadda, waxaad la soo xidhiidhi kartaa:

Xarun-cilmiyeedka goboleed ee carruurta iyo dhallinyarada, Woqooyi (RKBU Nord), ku maamulaha daraasadda Joshua Patras iimaylkiisa: pirm@uit.no ama telefoon: 77 64 62 65

UiT RKBU Nord

KAVLI FONDET

NORCE

NTNU
Regionalt kunnskapssenter
for barn og unge
– Psykisk helse og barnevern

Bufetat

Regionsenter for barn og unges psykiske helse
Helseregion Øst og Sør